

Hagaha waalidiinta ee Dugsiyada Spring Lake Park Kusaabsan Schoology



Kusoo dhawoow Schoology! Hagahaani wuxuu ku caawinayaa waalidiinta iyo ilaaliyaaha in ay fahmaan waxa schoology uu yahay iyo qaabka loo isticmaalo. Waxaad macluumaad dheeri ah ka heli kartaa barta caawimaada ee shabakada support.schoology.com

Waa maxay Schoology?

Schoology waa barnaamij online ah oo lagu maareeyo waxbarashada kaas oo kuu fududeynayo in aad la socoto fasallada ardaygaaga, tijaaboyinka iyo darajada Schoology waxaad u isticmaali kartaa:

- In aad eegto koorsooyinka canugaaga iyo kooxaha waxbarsho.
- In aad eegto imtixaanada canugaaga kuwa soo socda, kuwa hadda ah iyo kuwa uu la daahay, natiijoyinka iyo warcelinta macallinka.
- In aad la socoto Ogeysiisyada Iskoolka iyo koorsooyinka

Qaabka aad u heli karto Schoology

- Aad <https://schoology.springlakeparkschools.org>
- Isticmaal magaca iyo furaha aad ka heshay dugsiyada Spring Lake Park
- Hadii aadan lahayn magaca isticmaalka iyo furaha, kala xiriir caawiyaha farsamada Spring Lake Park ee techsupport@district16.org

Isticmaalka akoonkaaga waalidnimada/ilaaliyaha ee schoology



Fiiirinta dhadhaqaaqa canugaaga

Guji falaarta liiska dhadhacaya ee dhanka midigta ee qeybta sare ee akoonkaaga oo xigta magacaaga. Dooro magaca canugaaga si aad fiiriso dhaqdhaqaaqa akoonkaaga



Bogga hore

Laba waalid waxay leyihiin laba bog oo kala ah, ardaygana wuxuu leeyahay bog gooni ah sida facebook oo kale. Bogga hore waa halka uu tagayo qofka marka uu galo schoology Halkani waxaad arki kartaa dhamaan dhacdooyinka, dhaqdhaqaaqyada iyo wararka dhacay



Maadooyinka

Halkani waxaad arki kartaa liiska koorsooyinka canugaaga. Guji koorsaha si aad u hesho macluumaad dheeri ah, faafaahin iyo tijaabooyinka.



Kooxaha

Groups-ka waxaa inta badan loo isticmaala macluumaadka, shaqooyinka iyo xiisooyinka gaarka hadda tusaale ahaan canugaaga wuxuu ka mid noqon karaan kooxaha orodka oo leh koox schoology. Kooxaha ma bixiyaan darajoyin

Tilmaan: ilaalayaasha waxay kaliya oo ay arki karaan akoonka schoology ee canugooda.,
Korsooyinka iyo kooxaha. kuma biiri karaan korsooyinka kale ama kooxa kale ama masoo
dhigi karaan faallooyin ama ma marki karaan macluamadka ardayda kale.

Isticmaalka akoonada Schoology ee ardayga:

1 Marka aad dooraneyso magaca canugaaga ee geeska sare ee dhanka midigta. Waxaad si fudud u eegi kartaa maclumaad gaar ah oo kusaabsan dhaqadhaqaaqa canugaaga ee schoology:

Guji **Enrollments** si aad u fiiriso korsooyinka canugaaga iyo darajooyinka, Guji **Student Activity** si aad aragto ogeeysiiska kusaabsan natiijoyinka imtixaanada gaarka ah iyo warka kusaabsan. Gujinta **SLP logo** ee dhanka sare ee bidixda waxay dib kuugu celineysaa shaashadani.

2 Dooro **Enrollments** ee qeybta dhexe si aad u aragto liiska korsooyinka socda ee canugaaga iyo natiijoyinka guud. Guji korsada si aad u aragto natiijoyinka imtixanaadka iyo wada sheekeysiga

3 **Groups** hoosteeda, waxaad arki kartaa liiska koxaha schoology ee canugaaga. Kooxaha waxa loo isticmaali karaa shaqooyin kala duwan, sida mashaaricda dugsiga iyo kooxaha ka baxsan manhajka waxbarashada.

4 Qeybta **Grades** waxay tusinaysaa natiijoyinka ugu dambeeyay ee canugaaga.

5 Qeybta **Overdue** waxay tusinaysaa liiska tijaaboyinka uusan soo celinin canugaaga waqtigii looga baahnaa

6 Qeybta **Upcoming** waxay tusinaysaa liiska tijaaboyinka soo socda iyo dhacdooyinka.